

Xadaymaha iyo faritaannada ka jira adeegyada magaalada Tampere

Adeegyada magaalada Tampere waxaa laga fulinayaa [talooyinka ay soo jeediyaan guddiga hagista koronaha ee aagga Pirkanmaa](#). Xadaymahan iyo faritaannadan soo socda ayaa ka jira adeegyada magaalada:

Inta 20-ka sano ka yar waxaa loo oggolyahay inay koox ugu badnaan toban qof ka kooban ay hoolalka isboortiga hiwaayadahooda ugu fushadaan, sidoo kale gudaha dhismayaasha iskuullada, xannaanooyinka iyo maktabadaha. Sideeda kale hoolalka isboortiga iyo goobaha jirdhiska magaaladu way xirnaanayaan, ilaa amar dambe.

Hoolalka dabaashu si xadaysan bay ugu furanyihiin kooxo hiwaayadeedka 20-ka sano ka yar, iskuulleyda, inta 65-ta sano ka weyn, dadka kaararka khaaska ah leh iyo hawlgabka.

Way sii soconaysaa joojinta isboorti kooxeedka, isboortiga xarbiga iyo midka ciyaartoyda jirkoodu is taabanayo, ilaa guddiga hagista koronaha uu farriin kale ka soo saarayo.


Maktabadaha si caadi ah baa waxa la amaahanayo shelefyada looga soo qaadan karaa, laakiin goobaha akhriska iyo wargeysyada, meelaha lagu shaqeeyo ama hiwaayadaha lagu qabsado weli way sii xirnaanayaan. Macaamiishu waa inay isticmaalaan maaskarada wejiga, haddii aysan jirin xaalad caafimaad oo u diidaysa.

Goobaha dhaqanka iyo matxafyadu way furanyihiin. (Milavida waxaa la furayaa bisha labaad)

Goobaha da'yartu way xirnaanayaan ilaa amar dambe.

Dhammaan munaasabadaha guud ee lagu qabto goobaha dhismayaasha gudahooda ah ee magaalada, xadkoodu waa toban qofood.

Waxbarashada machadyada aqoonkororsiga dadka waaweyn waxaa loo wareejiyay dhinaca internetka ama waa la hakiyay, ilaa guddiga koronaha ee aaggu ay farriin kale ka soo gudbinayaan. Waxbarashada farshaxanka ee dadka 20-ka sano ka yar waxaa loogu sii wadi karaa kooxo tiradoodu toban ka yartahay.



Iskuullada magaalada Tampere waxaa laga fulinyaa talooyinka Machadka nololwanaagga iyo caafimaadka (THL) ee ku aaddan isticmaalka maaskarada wejiga, taasoo sheegaysa in wixii 12 sano ka weyn ay maaskaro isticmaalaan. Ardaydu iskuullaadkooda ayay ka helayaan talooyinka ku aaddan maaskarada iyo isticmaalkeeda

Shaqaalaha magaalada Tampere maaskarada wejiga ayay ku isticmaalayaan dhammaan goobahooda shaqo, sida xannaanooyinka carruurta, iskuullada, machadyada heerka labaad iyo xafiisyada. Caagga wejiga lagu gaashaamo ayay shaqaalaha xannaanooyinka iyo iskuulladu ku beddelan karaa maaskarada. Adeegyada daryeelka caafimaadka iyo arrimaha bulshada, si toos ah ayaa ugu horrayntii macaamiisha loogu fidinayaa. Iskuullada iyo waxbarashada heerka labaad, si caadi ah ayay Tampere uga soconayaan.

Safarrada aan loo baahnayn waa in laga joogo, gaar ahaan kuwa lagu tagayo gobollada uu fiditaanku ka socdo, sida aagga Helsinki wakhtigan la joogo.

www.tampere.fi/coronavirus

